

BAARISTA CAAFIMAADKA DADKA DHAWAANTA YIMID AUSTRALIA

Haddii aad dhawaantan timid waxaad jeceshahay inaad bilowdo barashada Ingiriisiga, carruurtaada aad dugsi ku qorto aadna shaqo hesho. Marka kowaad daryeel caafimaadkaaga jidheed iyo dhimireed, waxa kale oo dhan way sahlanaan doonaan in la sameeyo.



Isla markiiba aad timaado Australia, qofka shaqaalahaaga ah (caseworker) ayaa ballamo kuu samaynaya si aad dhaqtar u aragto. Halkan Australia Dhaqtarka qoyska waxaan ugu yeernaa "GP". Xataa haddii aadan xanuunsanayn waxaa muhiim u ah adiga iyo carruurtaada inaad tagtaan ballamaha GP ee kowaad. Baarista caafimaadkaaga waa u muhiim degitaanka Australia.

Asalka

- Dad badan oo Australia yimaada waxay ku helaan helitaan liita ee daryeelka caafimaadka waddanka dibadiisa.
- Dhibaatooyinka caafimaad Waxaa keeni kara cuntada liidata, xaladaha nololeed iyo biyaha aan saafida ahayn.
- Dadku waxay kaloo qabi karaan arimaha caafimaadka caadifadeed oo ay ka qaadeen dagaalada, xubin qoys iyo saaxiibo ay waayeen iyo xadgudubka xuquuqul insaanka.

Baarista caafimaadka ka-hor-safarka

- Dadka qaarkiis waxay soo mareen baarista caafimaadka ka hor intaysan iman, waxaana laga soo baaray HIV, tiibijada iyo cudurada kale sida malaariyada.
- Dadka qaarkiis waxaa kaloo laga soo daaweeyey gooryaanka, tallaalka miisaliska, qaama-qashiirka iyo rubeelaha
- Baarisyada caafimaadka safarka ka-hor Waxaa badanaa la sameeyaa bilo badan ka hor safarka, waxaana suurtagal ah inay ku dhacaan dhibaatooyin caafimaad ka dib natiijooyinkii hore, sababtaas darteed, baarisyada qaarkood waa lagu celiyaa ka dib markay yimaadaan Australia.

Maxaa loo sameeyaa baarista caafimaadka ka dib imaanshaha Australia?

- Waa tallaabo muhiim ah in la hagaajiyo caafimaadka ka dib imaanshaha Australia, Waxaa laga yaabaa in la helo dhibaatooyin caafimaad oo aan hore loo ogayn.
- Haddii la helo wax xanuun ah, Waxaa lagu siin doonaa daaweyn Haddii loo baahdo.
- Qofka shaqaalaha caafimaadka wuxuu kuu diri karaa kilinikada takhasuslaha si lagu siiyo talooyin dheeraad ah, ama adeegyada sida caafimaadka haweenka, caafimaadka ilkaha iyo indhaha, iyo la-talinta.



Maxaa ka mid ah baarista caafimaadka

Baarista caafimaadka waxaa iska leh qof kasta oo yimaada Australia, oo ay ka mid yihiin carruurta. **Waxay qaadan kartaa hal saac ama ka badan**, waxaana ka mid ah waxyaalaha soo socda:

- Su'aalaha la xiriira caafimaadkaaga
- Baarisyada jidheed
- Qaadista dhiigga, kaadida iyo saxarada
- Tallaalada.

Qofka shaqaalaha caafimaadka wuxuu ku weydiin karaa Haddii aad qabto wax dhibaatooyin ah kuwaas oo la xiriiri kara waayo-0aragnimooyinka ka hor imaanshaha. Waxaa jira adeegyada takhasus kuwaas oo kaa caawin kara inaad la qabsato arimahan.

Mararka qaarkood Waxaad u baahan kartaa wax ka badan hal booqasho kilinikada ama xafiiska dhaqtarka.

Tallaalka waa muhiim

- Si dugsiiga loogu qoro ilmahaagu wuxuu u baahan yahay in si buuxda loo tallaalo. Dugsiigu wuu diidayaa dugsi-ku-qoridda Haddii uusan ilmahaagu tallaalnayn.
- Haddii ilmahaagu dhammaysto tallaalkooda waxay u baahan yihiin warqad caddayn ah oo GP-gooda ka socota oo sheegaysa arrintaas.
- Waa inaad hubisaa in ilmahaagu dhammaysto kuurada tallaalkooda.
- Si aad u hesho lacag-bixinada Centrelink, ilmahaagu wuxuu u baahan yahay inuu si buuxda u tallaalan yahay.

Maxaad soo qaadanaysaa?

- Kaarka Medicare-ka, ama lambar, Haddii la heli karo
- Diiwaanada tallaalka iyo macluumaadka oo ku saabsan sooyaalkaaga caafimaad.
- Kaarka Daryeelka Caafimaadka.

Maxaa dhacaya ka dib baarista caafimaadka?

Qofka shaqaalaha caafimaadka wuxuu ku weydiin karaa inaad soo noqoto markii ay natiijooyinka baarista diyaar yihiin. Taas oo ah in daaweynta iyo dabagalkuba la diyaarin karo Haddii loo baahdo.

qarsoodinimada

Exceptional People. Exceptional Care.

ACN 096 708 922

Raymond Terrace, South Brisbane
Queensland 4101 Australia
Phone +61 7 3163 8111
www.mater.org.au



Baarista caafimaadka waa lacag la'aan waana qarsoodi, mana saameyaan xaaladaada degitaanka Australia. dhammaan natiijooyinka oo dhan waa qarsoodi, lamana siin karo dadka aan ku shuqul lahayn daryeelka caafimaadkaaga ayadoon la haysan ogolaanshahaaga. Shaqaalaha caafimaadka looma ogola inay cid ka hadlaan dhibaatooyinka caafimaadkaaga, marka laga reebo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee kale kuwaas oo ku shuqul lehbdaryeelkaaga.

Turjumaanada

Haddii uusan Ingiriisigu ahayn luqaddaada kowaad, turjumaan ayaa kaa caawin kara inaad la hadasho shaqaalaha daryeelka caafimaadka aadna hesho daryeelka caafimaadka ee ugu fiican. Fadlan weydii qofka shaqaalaha caafimaadka ah inuu kuu ballamiyo turjumaan, ama inuu kaaga waco Adeegga Turjumaanka Taleefanka ah **(TIS) 131 450**. Adeegga turjumaanku waa u lacag la'aan si uu adeegsado GP-gaagu.

Macluumaadka Caafimaaka oo Turjuman www.communityhealthhub.com.au

Thanks to South Eastern Sydney Illawara NSW Health for this information and translation.

Exceptional People. Exceptional Care.

ACN 096 708 922

Raymond Terrace, South Brisbane
Queensland 4101 Australia
Phone +61 7 3163 8111
www.mater.org.au

